IIB MA GALO

# FAAFIN RASMI AH

الجريدة الرسمية

JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA

Sannadka 16aad Muqdisho, 30ka Oktoobar 1988 L. 1 r 10

جريدة شهرية FAAFIN BIL SOO BAXA

Laanta Faafinta Rasmiga ee Madaxtooyada J. D. Soomaaliya

QIIMUHU: waa 5 shilin lambar waliba — RUKUNKA: Sanadii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibaddeedana waa Shs. 300. Rukunka l aweydiisto wuxuu ka bilaabmaa 1 Jannaayo. Qiimaha qoritaanku F.R. halkii sadar iyo waxii ka yar waa 2 Sh. — Rukunka iyo qoritaanku waxa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Lacagta.

## K O O B N I I N

### QAYBTA KOWAAD

### SHARCI

SHARCI L. 20 ee 26 Sebt. 1988, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 5 ee 3 Agoosto 1988, Canshuurta Dheefidda (tex departura) Bog; 756

SHARCI L. 21 ee 26 Sebt. 1988, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 6 ee 3 Agoosto 1988, Bankiyada gaarka ah ee J.D.S.. » 757

SHARCI L. 22 ee 20 Sebt. 1988, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 7 ee 15 Agoosto 1988, ee ku saabsan wax ka beddelid Sharciga Lr. 6 ee 28.12.71 Canshuurta Macaashka

SHARCI L. 23 ee 20 Sebt. 1988, U rogid Sharci Xeer Sharci L. 4 ee 1.8.88, wax ka beddelid da Sharciga Lr. 5 ee 5.11.1966, Canshuurta Daaraha. » 758

SHARCI L. 24 ee 20 Sebt. 1988, U rogid Xeerka Sharci Lr. 8 ee 15.8.1988, wax ka beddelid da Sharci Lr. 2 ee 7.1.1988, (Canshuurta Toosan. » 759

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 55 ee 7 Sebt. 1988, Magacaabid Taliyaha iyo Taliye Xigeenka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed. Gadista). » 760

QAYBTA SADDEXAAD

TALOOYIN ISGAARSIIN OGE. IYO WIXII LA MID AH.

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 19.9.88, Lumid 2 J/War. L. 1209564,1209565. ku qoran C/qaadir Maxamed Abuukar L.473 » 761

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 28.7.88, Lumid J/War. L. 0967384 ku qoran Cali Faarax Dhahar L. 474 » 762

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 17 9.88, Lumid B/Keyd L. 28225 ku qoran Ashwaaq Maxamed C/laahi L. 475 » 763

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 26.9.88, Lumid J/War. L. 0213348 ku qoran Muxyadiin Maxamuud Ismaaciil L. 476 » 764

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR, 6.9.88, Lumid 61 J/War. ku qoran Axmed Cabdulle Faarax L. 477 » 765

MAXKAMADDA G. BANAADIR 1.10.88 Lumid Jeeg War. L. 1224896 ku qoran Saciid Cabdullaahi Bootaan L. 478 » 766

MAXKAMADDA G. J/HOOSE 10.9.88 Lumid Jeeg War. L. 0310631 ku qoran Cali Barqadle Aadan L. 479 » 769

MAXKAMADDA G. BANAADIR 5.10.83. Lumid 20 Jeeg War. ku qoran Cabdullaahi Maxamed Caalin L. 480 » 770

MAXKAMADDA G. MUDUG 20.9.88 Lumid Jeeg War. L. A1276675 ku qoran Saynab Maxamed Cawaale L. 481 » 771

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.10.88, Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Xasan Daahir Axmed L. 482 » 772

MAXKAMADDA G. BANAADIR 25.9.88, Lumid Jeeg War. L. 1114358 ku qoran Maxamed Maxamuud Axmed L. 483 » 773

MAXKAMADDA G. BANAADIR 17.10. 88, Lumid Jeeg War. L. 0209150 ku qoran Saalax Maxamed Maxamuud L. 484 » 774

MAXKAMADDA G. BANAADIR 27.10.88 Lumid Jeeg War. L. 1280525 ku qoran Aamina Sheekh Abuukar L. 485 » 776

MAXKAMADDA G/SANAAG. 9.10.88, Lumid 2 Jeeg War. ku qoran Cilmi Cabdi Carroole L. 486 » 775

MAXKAMADDA G. BANAADIR 16.10 88 Lumid 5 Jeeg War. ku qoran Batuulo Faarax Colaad L. 487 » 777

MAXKAMADDA G. BANAADIR 6.9.88 Lumid Jeeg War. L. 0208232 ku qoran Axmed Shariif Ibraahim L. 488 » 778

MAXKAMADDA G. BANAADIR 11.10.88 Lumid Jeeg War. L. 0191923 ku qoran Maxamed Xirsi Yuusuf L. 488/bis » 779

QAYBTA KOWAAD

SHARCI

Sharci lambar 20 Tr. 26 Seba. 1988, U rogid Sharci Xeer Sharci Lr. 5 ee 3 Agosto 1988, Canshuurta Dhoofidda (tax departure).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa loo rogay Sharci, Xeerka Sharci Lr. 5 ee 3da Agosto 1988, (Canshuurta Dhoofidda), isagoo qodobadiisa 1aad iyo 2aad loo beddelay sida soo socota:

Qodobka 1aad Abuurid Canshuur.

Waxaa la abuuray Canshuurta Dhoofinta Caalamiga ah oo ku waajibeysa qof kasta oo ka dhoofaya garoommada Dayuuradaha, Dekadaha Dalka iyo kuwa xuduudda uga dhoofa Gawaari.

Qod. 2aad Qiimaha Canshuurta iyo qofka ay ku waajibeyso.

Qiimaha Canshuurta iyo qofka ay ku waajibeyso waa sida soo socta:

1. Qof kasta oo ajnabi ah ama qofka Soomaaliga ah oo Dibedda deggan ama dibofcomaasiga oo Dalka aan deggan een waxaa laga qaadayaa lacag dhan US Doolaar 20 (labaatan Doolaar) ama mid u dhiganta oo lacag adag ah.

2. Qof kasta oo muwaadin ah ama ajnabi deggane ah waxaa laga qaadayaa sh.so. 1.000= (kun shilin soomaali) Dhoofitaan kasta.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 26 Sep. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

Sharci lambar 21 Tr. 26 Seba. 1988. U rogid sharci xeerka Sharci Lr. 6 ee 3 Agoosto 1988, Bankiyada gaarka ah ee JDS

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka keliya

Waxaa loo rogay sharci Xeerka Sharci Lr. 6 ee 3da Agoosto 1988, «Bankiyada Gaarka ahee J.D.S.» isagoo qodobadiisa 1aad. iyo 2aad loo beddelay sida soo socota:

Qodobka 1aad

1. Dalka J.D.S. Waxaa laga furi karaa Bankiyo gaar ah oo ka qayb qaata maalgelinta mashaariicda wax soo saarka iyo horumarinta dhaqaalaha Dalka.

2. Bankiyadu waxay noqonayaan kuwo gaar ah (private) waxaana dhismahooda, maamulkooda iyo dhaqdhaqaaqooda lagu saldhigayaa shuruucda iyo Xeerarka Dalka.

Qodobka 2aad.

Maalgelinta dhismaha Bankiyada laga hirgelinaayo Dalka waxaa la waafajinayaa habka iyo nidaamka shuruucda Dalka iyo sharciga maalgelinta shisheeyaha ee J.D.S. Haddii Bankiga ajnabi wax ku leeyahay.

Muqdisho, 26 Sep. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

Sharci lambar 22 Tr. 20 Sebt. 1988. U rogid sharci Xeerka Sharci Lr. 7 ee 15.8.88. oo ku saabsan wax ka beddelid sharci ga Lr. 6 ee 28.12.71 Canshuurta macaashka Daaraha.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa loo rogay sharci Xeerka sharci Lr. 7 ee 15.8.88, wax ka beddelid Sharci L. 6 ee 28.12.71, kuna saabsan canshuurta Macaashka Daaraha.

Qodobka 2aad

Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Sebt. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

Sharci Lambar 23 Tr. 20 Sebt. 1988, U rogid sharci Xeerka Sharci Lr. 4 ee 1da Agoosto. 1988 wax ka beddelidda sharciga Lambar 5 ee 5 Nofember 1966 «Canshuurta Toosan.

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogta da ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Sharciga Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa loo rogay sharci, Xeerka sharci Lr. 4 ee 1da Agosto 1988, (wax ka beddelidda sharciga Lr. 5 ee 5ta Nofember 1966, Canshuurta Toosan), isagoo qodobkiisa labaad loo beddelay sida soo socota:

Qodobka 2aad (Boqolleyda Canshuurta).

Boqolleyda Canshuurta ku xusan qodobka 1aad waxay noqoneysaa 7% wixii miro ah oo Beeraleydu ka Iibiso sharikadda SOMALFRUIT.

Qodobka 2aad

Sharcigan wuxuu dhaqan gelayaa isla maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Sebt. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

Sharci lambar 24 Tr. 20 Sebt. 1983, U rogid sharci, xeerka sharci Lr. 8 ee 15.8.88 wax ka beddelidda sharci Lr. 2 ee 7.1.1984 (Canshuurta Gadista).

MADAXWEYNAHA JDS

ISAGOO TIXGELINAAYA: Oggolaashaha Guddiga Joogtada ah ee Golaha Shacbiga.

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

Waxaa loo rogay sharci Xeerka sharci Lr. 8 ee 15.8.88 wax ka beddelid sharci Lr. 2 ee 7.1.84 Canshuurta Gadista

Qodobka 2aad

Sharcigan waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 20 Sebt. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.
Maxamed Siyaad Barre.

QAYBTA LABAAD

XEER

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 55 ee 7 Sebt. 1988, Magacaabidda Taliyaha iyo Taliye xigeenka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

MADAXWEYNAHA JDS

MARKUU ARKAY: Qod. 82aad ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Sharciga Lr. 49 ee 25 Disember 1984 oo ku saabsan wax ka beddelidda Dastuurka.

MARKUU ARKAY: Qodobka 3aad, Sharciga Lr 2 ee 25ka Disember 1972 oo ku saabsan Nidaamka dhismaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

MARKUU TIXGELIYEY: In ay bannaanaatay Jagadii Hoggaaminta Ciidanka Booliska, taasoo ku timid geeridda Taliyihii hore ee Ciidanka, Marxuum S/Gaas AADAN CABDI DUCAALE.

MARKUU TIXGELIYEY: Xilka Culus ee Ciidanka Boolis ku uu u hayo Qaranka Soomaaliyeed, lagamamaarmaan na ay ugu muuqatay in degdeg loo magacaabo Ciidanka Madaxdii hoggaamin lahayd.

MARKUU DHEGEYSTAY: Guddiga Siyaasadda Golaha Dhexe ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyed

WUXUU SOO SAARAYAA

Xeerka Soo Socda:

Qodobka 1aad

S/Guuto AXMED JAAMAC MUUSE waxaa loo magacaabay Taliyaha Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Qodobka 2aad

S/Guuto CUSMAAN AXMED XUSEEN (Caanogeel) waxaa loo magacaabay Taliye ku xigeenka Ciidanka Booliska Soomaaliyeed.

Qodobka 3aad

Xeerkan waxa uu dhaqan gelayaa laga bilaabo 7da Sebt. 1988, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda.

Muqdisho, 7 Sebt. 1988.

MADAXWEYNAHA J.D.S.

Maxamed Siyaad Barre

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle C/qaadir Maxamed Abuukar.

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 2 J/War. Lamb. kala yahay 1209564,1209565, oo laga sameeyay L/3aad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan midkiba sh.so. 100.000, kuna qoran magaca Xaawo Jaamac Cilmi sida ku cad warqadda Lambar 1659 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed Laanta 3aad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabiiyo (Ammortamento) 2 J/War. Lr. kala yahay 1209564, 1209565, oo ka soo baxay Bankiga Ganacsi ga iyo keydka Soomaaliyeed L/3aad kuna qoran magaca Xaawo Jaamac Cilmi kuna jirto lacag dhan midkiba sh.so. 100.000,100.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 3aad ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaa liyeed in ay siiso J/le C/qaadir Maxamed Abuukar Lacagta Cadadkeedu yahay isu geyn sh.so. 200.000 oo ah bedelkii 2 J/War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horay sa aan wax is hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 19.9.1988.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOB. BANAADIR.
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 473

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR.

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cali Faarax Dhahir.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay J/War. Lr. 0967384 kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Cali Faarax Dhahir, sida ku cad warqadda Lr. 1508 kana soo baxday Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Sadexaad.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee Tr. 9.9.1966.

WUXUU XEERIYAY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 0967384 Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Sadexaad, kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Cali Faarax Dhahar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Saad, in ay siiso J/le Cali Faarax Dhahar, lacagta cadeyntu tahay sh.so. 100.000 oo ah bedalkii J/War. ee kor ku qoran markey ka soo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka horeysa wax is hortaag ah aan laga keenin.

Muqdisho, 28.7.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 474

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Ashwaaq Maxamed Cabdullaahi:

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Baag Kayd Lam. 28225 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 32.202.34 kuna qoran magaca Ashwaaq Maxamed Cabdullaahi sida ku cad warqadda lam. 1977 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Buug Kayd lam. 28225 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna jirto lacag dhan Sh.So. 32.202.34 kuna qoran magaca J.le Ashwaaq Maxamed Cabdullaahi.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta in ay siiso J.le Ashwaaq Maxamed Cabdullaahi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 32.202.34 oo ah bedelkii Buug Kaydka kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.9.88

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 475

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Muxyadiin Maxamuud Ismaaciil;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. Lam. 0213348 oo laga sameeyey Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 120.000 kuna qoran magaca Muxyadiin Maxamuud Ismaaciil sida ku cad warqadda lam. 10573 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar:

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9 1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L 0213348 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna qoran magaca Muxyadiin Maxamuud Ismaaciil kuna jirto lacag dhan Sh.So. 120 000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 1aad Xamar ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso Muxyadiin Maxamuud Ismaaciil lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 120.000 oo ah bedelkii Jeeg War. oo kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 26.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 476

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

### QAYBTA MADANIGA

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Cabdulle Faarax;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay dhumeen 61 Jeeg War. ee hoos ku tixan laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 6.065.000 magaca iyo Laantana mid walba ku hor qoran yihiin sida ku cad warqadda lam. 9635 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca | ku | qoran | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 1153541 | 100.000 | Raaliya | Axmed | Culusow | W/dhiigley |
| 1153533 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153258 | 100.000 | » | » | » | » |
| 115361 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153531 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153529 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153259 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153525 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153527 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153542 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153539 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153540 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153534 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153538 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1153536 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153526 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153523 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153262 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153535 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153530 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153537 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153260 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153524 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153528 | 100 000 | » | » | » | » |
| 1153532 | 100 000 | » | » | » | » |
| 0398933 | 50.000 | » | » | » | » |

| | | | |
|---|---|---|---|
| 0598934 | 50.000 | » » » | » |
| 1153164 | 100.000 | Warsame Maxamed Xasan | » |
| 1153165 | 100.000 | » » » | » |
| 1153166 | 100.000 | » » » | » |
| 1153335 | 100.000 | Xirsiyo Cabdi Cilmi | » |
| 1153336 | 100.000 | » » » | » |
| 1153223 | 100.000 | Xabiiba Ciise Maxamed | » |
| 1117664 | 100.000 | Ibraahim C/maan Xuseen | » |
| 0982830 | 100.000 | C/risaaq Shariif C/llaahi | Wadajir |
| 0982831 | 100.000 | » » » | » |
| 0982832 | 100.000 | » » » | » |
| 0372605 | 100.000 | Badar Busuri | Baraawe |
| 0372606 | 100.000 | » » | » |
| 1114157 | 100.000 | Axmed Guure Rooble | Xarunta |
| 1114158 | 100.000 | » » » | » |
| 1114159 | 100.000 | » » » | » |
| 0089259 | 150.000 | Xasan Cilmi Colow | 1/Hargeysa |
| 1090133 | 100.000 | Xasan Maxamed Xasan | » |
| 1091865 | 100.000 | Xaaji Cali Bootan | » |
| 0089761 | 160.000 | Nuur Maxamed Cali | » |
| 0673268 | 50.000 | Maxamed Xersi Nuur | » |
| 0593963 | 50.000 | Axmed C/llaahi Caateye | 3/Hargeysa |
| 0946603 | 100.000 | Badel Maxamed Axmed | 4/Xamar |
| 0946379 | 100.000 | Ibraahim Cali Gaabo | » |
| 0946992 | 100.000 | Xumar Xasan Yuusuf | » |
| 0153330 | 300.000 | Jaamac Maxamuud Cusmaan | 3aad |
| 1157529 | 100.000 | Axmed Saalax Xandulle | » |
| 1034127 | 100.000 | Axmed Guure Rooble | Berbera |
| 0593530 | 100.000 | Daahir Odawaa Caalim | Boorame |
| 0999753 | 100.000 | Maxamed Rooble Bulaale | » |
| 1110491 | 100.000 | Faarax Maxamed | 2aad |
| 0953006 | 100.000 | Cawad Kaahiye | » |
| 1067309 | 100.000 | Shariif Xasan Axmed | Marka |
| 0533020 | 50.000 | Cabdullaahi Axmed Xuseen | G/kacyo |
| 624721 | 5.000 | Guuleed Nuur Xuseen | Boosaaso |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku taxan oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka

Soomaaliyeed guud ahaan lacagtooduna ay dhan tahay Sh. So. 6.065.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laaamaha kor ku xusan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiyaan J.le Axmed Cabdulle Faarax lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 6.065.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega oo kor ku xusan markay ka soo wareegto mud do aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aan ka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka harreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB

(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 477

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR,

QAYBTA MADANIGA

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J/le Jaamac Xasan Maxamed.

HADDUU TIXGELIYEY: In uu Lumay J/War. Lr. 1224896 laga sameeyay L/Gaal kacyo ee Bankiga Ganacsiga & Keydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000 kuna qoran magaca Saciid C/laahi Bootaan sida ku cad warqadda Lr. 9999 ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed Laanta Gaal Kacyo.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) J/War. Lr. 1224896 oo ka soo baxday Bankiga Gancsiga iyo keydka Soomaaliyeed L/Gaal Kacyo kuna qoran magaca Saciid C/laahi Bootaan kuna jirto lacag dhan sh.so. 100.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Gaal Kacyo ee Bankiga Ganacsiga iyo keydka Soomaaliyeed in ay siiso J/le Jaamac Xasan Maxamed Lacagta cadadeedu tahay sh.so. 100.000 oo ah beddelkii J/War. kor ku xusan markay kasoo wareegto muddo aan ka yareen 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee J.D.S. Haddii inta ka hora ysa aan laga keenin wax is hortaag ah.

Muqdisho, 1.10.88.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi.

L. 478

MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE.

HADDUU ARKAY: Codsiga Taariikhdiisu tahay 10.9.88, ee uu soo qortay J/le Jaamac Bille Saciid, oo Scomaali ah Degan Jamaame, kuna saabsan Lumid J/War. ee Lam. 0310631 ee ay ku qoran tahay lacag dhan sh.so.50.000 lagana sameeyay Bankiga Ganacsiga iyo keydka L/Kis maayo Taariikhda 25.8.88, kuna qoran magaca Cali Ba rqadle Aadan.

HADDUU ARKAY: Ogeysiiska Bankiga Ganacsiga iyo keyd

ka L/Kismaayo ee Lam. 602 ee ku sabsan Baafin J/War ee Lam. 03100631 ee ay ku qoran tahay lacag dhan sh.so 50.000 lagana sameeyay Laantaasi.

HADDUU ARKAY: Qodobka 69 DI 9.9.65. N2.

WAXAA LA AMRAYAA

In Dib loo Cusboonaysiiso J/War. ee Lambarkiisu sare ku xusan yahay kadib markii ay ka soo wareegto 30 maalm ood oo ka bilaabanaysa maalinta laga shaaciyo Faafinta Ra smiga ah ee Dawladda. J/War. ee la samayn doono waa in lagu qoraa magaca J/le Jaamac Bille Saciid, oo loo Jiraa reeyey, Gacantana laga saaro isaga ama cid ka sidato Wo kaalada Sharci ah iyadoo la sugayo mudada 30 Casho ah ee aan kor ku soo Sheegnay.

GUDOOMIYAHA MAXKAMADDA GOBOLKA J/HOOSE
Dr. Maxamud Axmed Faarax.

L. 479

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Cabdullaahi Maxamed Caalin;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 20 Jeeg War. ee hoos ku taxan, laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 2.270.000 ku qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 10965 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | | | Laanta |
|---|---|---|---|---|---|
| 0196915 | 300.000 | Cabdullaahi | Maxamed | Caalin | W/dhiigley |
| 0197281 | 200.000 | » | » | » | » |
| 1220280 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220740 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220741 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220742 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220281 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220282 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220283 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220284 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220285 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220286 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220287 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220288 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220289 | 100.000 | » | » | » | » |
| 1220290 | 100.000 | » | » | » | » |
| 0714325 | 50.000 | » | » | » | » |
| 716801 | 20.000 | » | » | » | » |
| 1220275 | 100 000 | Cabdullaahi Dilix Caalin | | | » |
| 0197291 | 200.000 | Axmed Maxamed Weheliye | | | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku taxan ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh. So. 2.270.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Wardhiigley in ay siiso J.le Cabdullaahi Maxamed Caalin lacagta cadadkeedu yahay Sh.So. 2.270.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 5.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 480

## MAXKAMADDA GOBOLKA MUDUG

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Mudug, ka dib:-

MARKUU ARKAY: Arjiga Taariikhdiisu tahay 20.9.88 oo uu soo qortay Jaalle Maxamed Axmed Nuur oo uu ku codsaday in loo cusboonaysiiyo Jeeg War. Lr. A1276675 oo ay ku jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 (Boqolkun) kuna qoran magaca Saynab Maxamed Cawaale;

MARKUU ARKAY: Warqadda Taariikhdeedu tahay 20.9.1988 oo ka soo baxday Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Gaalkacyo, laguna caddeeyey in uu Jeeggaasi jiray si Sharci ahna ugu soo wareegay gacanta Maxamed Axmed Nuur, uuna ka lumay;

MARKUU ARKAY: Qod. 69aad ee Xeer-Sharci L. 2 soona baxay 9.9.1965kii;

WUXUU AMRAYAA

In la baabi'iyo Jeegga lumay oo kor ku tilmaaman, looguna beddelo Jaalle Maxamed Axmed Nuur Jeeg cusub oo u dhigma kan lumay, ka dib markii Amarkaan lagu qoro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda ayna ka soo wareegto 30 maalmood, haddaan muddadaas wax is hor taag ah laga keenin, waana in Jeegga cusub gacanta laga saaro Maxamed Axmed Nuur amase cid wakaalad Sharci ah ka haysata.

GUDDOOMIYAHA MAX. G. MUDUG
(Sh. Cabdullaahi Hilowle Cali)

L. 481

## MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

## GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Xasan Daahir Axmed;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 5 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 300.000 kuna qoran magaca J.le Xasan Daahir Axmed sida ku cad warqadda lam. 12523 ee Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 1125649 | 100.000 | Xasan Daahir Axmed | 2/Xamar |
| 1125650 | 100.000 | » » » | » |
| 0692097 | 50.000 | » » » | » |
| 0692096 | 30.000 | » » » | » |
| 0005621 | 20.000 | » » » | » |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga Lr. 2 ee 9.9.1966.

### WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh. So. 300.000 ku qoran magaca J.le Xasan Daahir Axmed.

### WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Xasan Daahir Axmed lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 300.000 oo ah bedelkii Jeegagga War. ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaamo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 482

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Faadumo Yuusuf Maxamuud;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu dhumay Jeeg War. lam. 1114358 oo laga sameeyey Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca Maxamed Maxamuud Axmed sida ku cad warqadda lam. 203 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1114358 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qoran magaca Maxamed Maxamuud Axmed kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000/=.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta Xarunta ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed in ay siiso J.le Faadumo Yuusuf Maxamuud lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto mudoo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 25.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 483

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Muxiyadiin Cabdi;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0209150 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 ku qoran magaca J.le Saalax Maxamed Maxamuud sida ku cad warqadda lam. 12522 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0209150 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 ku qoran magaca Saalax Maxamed Maxamuud.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Xamar in ay siiso J.le Maxamed Muxiyadiin Cabdi lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horeysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 17.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 484

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay J.le Aamina Sheekh Abuukar;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. lam. 1280525 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Sheekh Abuukar sida ku cad warqadda lam. 12870 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 1280525 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 100.000 kuna qoran magaca J.le Aamina Sheekh Abuukar.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 1aad Xamar in ay siiso J.le Aamina Sheekh Abuukar lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 100.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 27.10.88

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 485

MAXKAMADDA GOBOLKA SANAAG

MGS/116/88 Ceerigaabo, 9.10.88

UJEEDDO: Bedelaad Jeegagga Wareega L. 0667711 iyo J.W.L. 0075000.

Guddoomiyaha Maxkamadda Gobolka Sanaag, Markuu Arkay codsiga T. 3.10.88, ee uu Maxkamadda u soo qortay J.le Cilmi Cabdi Carroole, isagoo ka codsaday Maxkamaddan in loo baafiyo Jeegagga ka lumay;

MARKUU ARKAY: Waxa uu ku saabsan yahay codsigaasu;

MARKUU ARKAY: Ogeysiiska Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Ceerigaabo, sida ku cad warqadda sumadeedu tahay 00167 ee 4.10.88, taasoo ay ku cadahay in ay lumeen Jeegaggaasu Wareega ee kala ah: J.W. 0667711 kuna qoran tahay lacag dhan Sh.So. 30.000 kuna taariikhaysan 27.6.88, lagana sameeyey Laanta Ceerigaabo iyo J.W.L. 0075000 ayna ku qoran tahay lacag dhan Sh.So. 20.000 lagana sameeyey Ceerigaabo, Jeegaggaasoo laga baafiyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Laanta Ceerigaabo, T. 27.6.88 lacagta ku qoran Jeegaggaas waxay dhan tahay Sh.So. 50.000 magaca ku qoranina waa Cilmi Cabdi Carroole;

MARKUU ARKAY: Qod. 69 D.L. 9.9.65 N/2 Lumid Jeegagga Wareega.

WUXUU AMRAYAA

In la cusboonaysiiyo J.W.L. 0667711 iyo J.W.L. 0075000, ka dib markii ay ka soo wareegto muddo (30) beri, ka dib marka Go'aanka lagu shaaciyo Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

WAXAA LAGA CODSANAYAA

In Jeegagga cusub ee la sameyn doono gacanta laga saaro J.le Cilmi Cabdi Carroole, ama qof isaga ka sita wakaalad sharci ah, iyadoo la sugayo muddada kor ku xusan.

Guddoomiyaha Max. G. Sanaag Ceerigaabo

(Dr. C/raxmaan Sh. Maxamed)

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Batuulo Faarax Colaad;

HADDUU TIXGELIYEY: In ay lumeen 5 Jeeg War. ee hoos ku qoran laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha hoos ku qoran kuna jirto guud ahaan lacag dhan Sh.So. 600.000 kuna kala qoran magacyo kala duwan sida ku cad warqadda lam. 12401 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed;

| J.W.Lr. | Sh.So. | Magaca ku qoran | Laanta |
|---|---|---|---|
| 0046754 | 200.000 | Saciid Jaamac Bootaan | W/dhiigley |
| 1033350 | 100.000 | » » » | Berbera |
| 1033352 | 100.000 | » » » | » |
| 1052221 | 100.000 | Maxamed Cali Ismaaciil | Burco |
| 1048647 | 100.000 | Maxamed Siyaad | 2/Hargeysa |

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeegagga War. ee kor ku qoran ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan guud ahaan Sh.So. 600.000 ku qoran magacyada kor ku xusan.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laamaha kor ku qoran in ay siiyaan J.le Batuulo Faarax Colaad lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 600.000 oo ah bedelkii Jeegagga Wareega ee kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maaluood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 16.10.88

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 487

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR

QAYBTA MADANIGA

GUDDOOMIYAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Axmed Shariif Ibraahin;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0208232 oo laga sameeyey Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed, kuna jirto lacag dhan Sh. So. 500.000 kuna qoran magaca J.le Axmed Shariif Ibraahin si-da ku cad warqadda lam. 9740 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 5aad Tr. 1.9.88;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 ee Sharciga L. 2 ee 9.9.1962

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0208232 oo ka soo baxay Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaali-yeed Laanta 5aad kuna qoran magaca Axmed Shariif Ibraa-hin kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000.

WAXAA LA AMRAYAA

Laanta 5aad ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaa liyeed in ay siiso J.le Axmed Shariif Ibraahin lacagta cadad-keedu yahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku xusan markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faa-finta Rasmiga ah ee JDS haddii inta ka horreysa aan wax is-hortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 6.9.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 488

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GARSOORAHA MGB

HADDUU ARKAY: Arjiga uu soo qortay Jaalle Maxamed Xirsi Yuusuf;

HADDUU TIXGELIYEY: In uu lumay Jeeg War. Lam. 0191923 laga sameeyey Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 ku qoran magaca J.le Maxamed Xirsi Yuusuf sida ku cad warqadda lam. 12328 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar;

HADDUU ARKAY: Qod. 69 Sharciga L. 2 ee 9.9.1966

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (Ammortamento) Jeeg War. L. 0191923 ee Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar kuna jirto lacag dhan Sh.So. 500.000 ku qoran magaca J.le Maxamed Xirsi Yuusuf.

WAXAA LA AMRAYAA

Bangiga Ganacsiga iyo Kaydka Soomaaliyeed Laanta 2aad Xamar in ay siiso J.le Maxamed Xirsi Yuusuf lacagta cadadeedu tahay Sh.So. 500.000 oo ah bedelkii Jeeg War. kor ku qoran, markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 15 maalmood laga bilaabo maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee JDS, haddii inta ka horreysa aan wax ishortaag ah laga keenin.

Muqdisho, 11.10.1988

GUDDOOMIYAHA MGB
(Dr. Cabdullaahi Axmed Xaashi)

L. 488/bis